



Barnaamujka farsamaha

SOMALISKA

Barnaamujka farsamaha waa barnaamuj waxbarashada sare diyaarin u ah oo lagu qaadanaayo shahaado waxbarashada sare diyaarin u ah.

Barnaamujka farsamaha wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu ka shaqeeyo farsamaha iyo isbeddelka farsamaha. Waxbarashadu waxa ay aasaas u tahay waxbarasho dambe oo jaamacadda lagu baranayo farsamaha iyo cilmiga sayniska. Waxaad sidoo kale heli doontaa u qalmid maadooyin kale.

SHAN JIHO OO KALA DUWAN

Naqshad iyo badeecad horumarinta

- Waxaad wax ka barandoontaa naqshad iyo badeecad horumarinta iyada oo ahmiyadda la saarayo naqshadda oo kombiyuutar ku hoggaansan iyo rakibid.

Farsamaha warbixinta- iyo qalabka isgaadhsiinta

- Waxaad wax ka barandoontaa warbixinta, isgaadhsiinta iyo siyaabaha kale oo isgaadhsiinta kombiyuutarka ah, barnaamij gelinta kombiyuutarka, qalabka isgaadhsiinta oo lambaraha leh iyo horumarinta bogga internetka.

Farsamaha wax soo saaridda

- Waxaad wax ka barandoontaa wax soo saaridda iyo shirkadeynta iyada oo otomaatig ah iyo xukumeynta waddooyinka wax soo saaridda.

Dhisidda bulshada iyo deegaanka

- Waxaad wax ka barandoontaa dhisidda bulshada, deegaanka iyo farshaxanka dhismaha halkaas oo farsamuhu muhiim yahay sida uu cilmiga noolaha iyo deegaanka, muqaalka iyo dhaqaaluhu muhiim u yahay.

Cilmiga farsamaha

- Waxaad wax ka barandoontaa habka shaqada eecilmiga farsamaha iyo qalabka noocyaasha xisaabta, ciyaaraha, hogaaminta iyo nidaaminta.

Waxaan baad barnaamujka ku barandoontaa

Waxaad horumarindoontaa cilmiga aad ka leedahay farsamaha, fisigiska, kimistariga iyo xisaabta iyada oo ahmiyadda la saarayo isbeddelka farsamaha. Waxad baraneysaa arkidda xiriirka u dhaxeeyo qeybabka kala duwan marka farsamaha la horumarinayo iyo fahmidda horumarka farsamaha oo ka dhacayo bulshada. Waxaad dhigandoontaa farsamaha jira hadda iyo horumarka farsamo cusub.

Habkaan buu barnaamujku u diyaarsanyahay

Barnaamujka culuunta dabiiciga ah maadooyinka wadajirka u ah dugsiga sare waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, diinta, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqad labad ah. Barnaamujyaasha oo diyaarinta u ah waxbarashada sare waxaad ku akhrisan doontaa koorsooyin badan oo cilmi dhegood ah oo aanan lagu akhrisan barnaamujyaasha xirfadeed.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: fisigis, kimistari iyo farsamaha.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Kuwaasi waxay ahaan karaan maadooyin oo tusaale ahaan ah: farshaxanka dhismaha, masawirka, bayoolojiga, barashada dabka korontada, farsamaha dhacdooyinka, faylosofi, fisigis, juquraafi, taariikh, mujtamaca raagaya, farsamaha daawada, farsamaha shabakadda, cilmiga rabbaynta iyo waxbaridda, barnaamuj gelinta kombiyuutarka, cilmiga nafsigu, iswiidhishka iyo farsamaha bogga internetka. Iskoolka ka wareyso maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

Habka shaqada

Barnaamujka waxaad ku baareysaa oo aad ka shaqeyneysaa warbixin adiga oo hab dhalaaceyn ah u eegaya. Waxaad ka bilaabeysaa dhibaatooyin waaqici ah oo aad keligaa xallineysid ama aad dad kale la xallineysid, badanaa hab mashruuc ah. Waxaad tabobareysaa awoodaada aad ku horumarineysid xal cusub oo wax ku ool ah, sidoo kale waxaad barandoontaa habka loo wado shirkad gooni ah.

Waxaad baraneysaa wax baadhidda, naqshadeynta, jilidda, qiimeynta caqli galka ah, horumarinta, eegidda xiriirka, natiijo gaaridda iyo doodidda, si sifican loo fahmo nidaamka farsamaha.

Shaqada dugsiga sare

Dhamaadka barnaamujka farsamaha waxaad sameyn doontaa shaqada dugsiga sare. Halkaas waxaad ku qeexaysaa su'aal, waad qorsheyneysaa, waad gudagaleysaa, sidoo kalena waad qiimeyneysaa shaqo weyn oo ka ambaqaadmeyso maadooyin aqoon oo muhiim ah oo ka mid ah barnaamujka.

Arrin in lagu fikiro u baahan

Haddii aad rabtid u qalmid khaas ah oo mid ka mid ah waxbarashada jaamacadda waa in aad qorsheysatid daraasooyinkaada. Waa ay fiicantahay in lala hadlo macallinka xirfadaha- iyo waxbarashada, haddii aad rabtid in aad jaamacad aadid.

Markasta waxaad xaqq u leedahay, doorashada gaarka ah dhexdeeda, in aad dooratid koorso sii dheer oo ciyaaraha- iyo caafimaadka ah iyo koorso bilic ah.